

Haddii aan ahay qof hela adeegyada caafimaadka maskaxda ee dadweynaha, waa maxay xuquuqda aan leeyahay?

WAXAAD LEEDAHAY XUQUUQAHA SOO SOCDA:

- In lagula dhaqmo si qaddarin iyo sharaf leh
- In la tixgeliyo qarsoodiga arrimahaaga
- In lagaa caawiyo dhismaha qorshaha daryeelka iyo adeegyada ee baahidaada buuxinaya
- In aad ka qayb qaadato go'aannada la xiriira daryeelka caafimaadkaaga maskaxda
- In aad adeegyada ka heli karto meel carqalad lahayn (oo aad heli karto)
- In aad codsato magacyada, meelaha ay ku yaalliin, lambarrada taleefoonada, iyo luqadaha hay'adaha deegaanka
- In aad hesho tirada iyo muddada ay qaadanaayso adeegyada aad u baahan tahay
- In aad codsan karto macluumaadka la xiriira dhismaha maamulka iyo hawlaha RSN
- In aad xaq u leedahay in aad hesho adeegyada gargaarka degdegga ah iyo daryeelka degdegga ah 2 saacadood gudahooda
- In aad xor ka ahaato in gooni lagu saaro ama lagu xannibo/xiro
- In aad hesho adeegyo ku habboon da'daada iyo dhaqankaaga
- In lagu helo khabiir turjubaan ah iyo in bilaash lagu turjumo qoraallada
- In aad fahanto noocyada daaweynta kala duwan ee jira iyo waxyaabaha beddeli kara
- In aad diido daaweyn kasta ee lagu soo jeediyo
- In aad daryeelka hesho kala sooc iyo takoor la'aan (tus. da'da, jinsiya, nooca xanuunka)
- In aad xor ka ahaato dhibaateynta iyo ka faa'idaysiga galmada
- In lagu micneeyo dhammaan daawooyinka lagu qoro iyo ciladaha ay keenaan
- In aad dardaranto, kaasoo ay ku cad tahay xulashadaada iyo rabitaankaaga
- In aad hesho adeegyada caafimaadka ee loo baahan yahay oo ay tayadoodu fiican tahay
- In aad ra'yi labaad ka hesho qof ku taqasusay caafimaadka maskaxda
- In aad cabasho ka gudbiso hay'addaada ama RSN
- In aad soo gudbiso rafcaanka PIHP oo ku saleyan qoraalka Ogeysiiska Waxqabadka PIHP
- In aad xulato dhakhtarka caafimaadka maskaxda ama aad mid u xusho ilmahaaga ay da'doodu ka yar tahay seddex iyo toban sano
- In aad iska beddesho dhakhtarka caafimaadka maskaxda 30-ka maalmood ugu horreysa gudaheed, mararka qaarkoodna si joogta ah
- In aad soo gudbin karto codsiga dhageysiga (caddaalad) maxkamadda
- In aad codsan karto oo aad heli karto koobiga macluumaadkaaga caafimaadka iyo in aad codsan karto in wax laga beddelo
- In aad xor ka ahaato aargoosi

Greater Columbia Behavioral Health

Regional Support Network
101 N. Edison
Kennewick, WA 99336
509-735-8681/1-800-795-9296